Qaaxada

TILMAANSIINTA BUKAANKA

Razvanjp/Dreamstime.com

Qoraalkan tilmaansiinta ah waxaa laguugu sheegayaa waxyaabo muhiim ah si daaweynta qaaxada lagaa daaweynayaa ugu fusho sida ugu fiican ee suuragalka ah. Marka qaaxada lagaa daaweynayo waxaa lagaaga baahan yahay adkaysi badan iyo inaad wax walba u samayso sida lagu yiraahdo u samee. Shaqaalaha caafimaadku sida ugu fiican ee awoodooda ah bay kuu caawinayaan oo kuu taageerayaan. Wadashaqayntaa lagu gaaraa maxsuulka ugu fiican.

Adiga waxaa lagaa helay cudurka qaaxada oo ay keento bakteeriyada la yiraahdo *Mycobacterium tuberculosis*. Cudurka qaaxadu waa cudur inta badan ku dhaca sambabada. Cudurka qaaxada daawooyin baa lagu daaweeyaa, waadna ka bogsaneysaa, haddii aad daawooyinkaaga qaaxada darteed laguu siiyey oo dhan isticimaashid oo aad muddada daaweyntu kuu socoto oo dhan si joogto ah daawooyinka u qaadatid sida loogu talagalay. Baaritaanadda qaaxada, daawooyinteeda, daryeelka aad isbitaalka ku jirto iyo kontoroolada dambe ee xaaladaada lagula soconayo, dhammaan waxyaabahaasi lacag la'aan bay adiga kuu yihiin.

Qaaxada miyaad qaadsiinaysaa dadka kale?

Qaaxada hawada ayaa laysku qaadsiiyaa, haddii qofku neefsado bakteeriyada qaaxada ee hawada ku jira oo ay intay bakteeriyadii neefta raacdo sidaas sambabada ku gaarto. Qaaxada laguma kala qaado alaabta ama qalabka cuntada lagu cuno oo kale haddii laysla isticimaalo. Haddii aad qabto nooca qaaxada ee jidka neefsashada (qaaxada sambabada) waa suuragal inaad qof kale qaadsiisid. Markaad qufacdo ama hadasho ama aad hindhisto ama aad heesto waxaa hawada ku faafinaysaa bakteeriya badan oo cudurkii faafinaya. Inuu qofku cudurka cid kale qaadsiin karo iyo in kale waxaa la ogaadaa iyadoo qofka xaakadiisa baaritaan midabayn ah lagu samaynayo, baaritaanka maxsuulka ka soo baxaa haddii uu boositif yahay, macneheedu waa, inay aad khatar u tahay inuu qofku weli cudurka dadka kale qaadsiin karo.

Inay bakteeriyadu hawada ku faafto waxaad kaga hortegi kartaa adigoo markaad qufacayso afkaaga iyo sankaaga ku daboolaya sufeleetiga halka mar la isticimaalo oo aan hawada sii deyn ama haddii aadan sufeleeti haysan, gacantaada cududeeda iyo garabka ku qufac si ay afka iyo sanka u daboolaan (yskimällä olkavarren hihaan). Mararka qofku dhowr todobaad daawooyinka isticimaalo waxaa aad u yaraanaya khatartii ahayd inuu dadka kale qaadsiin karo. Sida caadiga ah carruurtu cudurka qaaxada ma qaadsiiyaan dadka kale, sababtoo ah markay qufacaan, qufacoodu waa daciif, inta badanna qaaxada carruurta ku dhacdaa waxay ku dhacdaa meelo kale oo aan sambabada ahayn.

Sidee loo daaweeyaa cudurka qaaxada?

Qofku wuxuu cudurka qaaxada si toos ah oo joogto ah uga bogsan karaa, haddii uu muddo dheer daawada qaato oo keliya. Bakteeriyadu waa mid adkaysi badan oo si fudud bay u noqon kartaa mid daawada la qabsatay oo daawadu aanay waxba ka tarayn. Sidaas darteed cudurka daaweyntiisa waxaa loo isticimaalaa noocyo badan oo daawooyin ah oo laysla isticimaalo muddo lix bilood ah. Wakhtiga ay tahay in daawooyinka la isticimaalo

Si sax ah u qufac – dadka kale cudurka ha qaadsiin

- **Dadka kale ha ku quficin.**
- **Markaad qufacayso ama hindhisayso safaleeti afka iyo sanka ku dabool.**
  Haddii aadan safaleeti haysan shaatigaaga gacantiisa xageeda sare ku qufac.
- **Safaleetiga qashinka ku rid.**
- **Gacmaha iska dhaq ama isticimaal dareeraha gacmaha lagu nadiifiyo ee jeermiska dila.**

Daneel, Efired, Lisafx, Mifilippo, Invictuss999/Dreamstime.com

wuu sii dheeraanayaa, haddii daawooyinka iyadoon wakhtigoodii dhammaan daawooyinka isticimaalkooda la joojiyo cillad ay keeneen darteed, ama ay noqoto in daawooyinka la beddelo ama haddii bakteeriyadu daawooyinka qaar adkaysi u yeelato oo ay wax ka tari waayaan.

Cudurku markuu mid guud noqdo iyo manajaytiska (aivokalvotulehdus) iyo qaaxada lafaha ku dhacda daaweyntoodu waxay qaadataa 9-12 bilood. Haddii cudurku uu yahay mid bakteeriyadiisu u adkaysan karto ugu yaraan laba nooc oo daawooyinka aasaasiga ka mid ah, markaas wakhtiga daaweynta cudurku waxay qaadan kartaa qiyaastii laba sannadood.

Marka qofka laga daaweynayo cudurka qaaxada waxaa loo baahan yahay in la tixgeliyo daawooyinka kale ee uu qofku isticimaalo, sababtoo ah waxaa jira daawooyin ay dhici karto in waxtarkoodu baaba'o, haddii daawooyinka qaar ka mid ah isku mar lala isticimaalo. Sidaas darteed waa muhiim ah inaad dhakhtarka u sheegto daawooyinka aad isticimaasho oo dhan.

Uurka iyo nuujinta naaska

Si badbaado leh baa cudurka qaaxada looga daaweyn karaa dumarka uurka leh iyo kuwa ilmaha naaska nuujiyaba. Isla markaasna waxaa laga hortagaa, in ilmaha yari aanu cudurka qaadin.

Muxuu yahay daryeelka karantiinku?

Cudurka qaaxada waxaa si fudud qof kale loo qaadsiin karaa, intaan qofka qaaxada qaba daawada loo bilaabin ka hor iyo wakhtiga bilowga ah ee uu qofku daawada qaadanayo. Daryeelka karantiinka waxaa loogu talagalay in lagaga hortago, inuusan cudurku ku faafin dadka kale ee qofka cudurka qaba u dhow, dadka kale ee bukaanka ah iyo shaqaalaha. Qofka cudurka qaaxada qaba ee weli dadka kale qaadsiin kara waxaa lagu daryeelaa isbitaalka qol u gaar ah, oo leh isbeddelka hawadiisa oo la sii xoojiyey oo gaar ah. Sida caadiga ah qofku wuxuu daryeelka karantiinka ku jiraa marka daawada loo bilaabo ugu yaraan laba todobaad. Wakhtiga uu qofku karantiinka ku jiro sida caadiga ah looma ogola inuu qolkiisa karantiinka ka soo baxo. Dadka shaqaalaha ahna markay qolka karantiinka gelayaan waxay xirtaan qalab ka celinaya qofka cudurka qaba neeftiisa.

Haddii cudurkaaga qaaxadu yahay mid daawooyinka u adkaysan kara, daryeelka karantiinka waxaad ku jireysaa ilaa inta laga hubsanayo in daawooyinka lagu siiyaa ay bakteeriyada wax ka tarayaan oo aanay jirin khatar ah in uu qof kale cudurka kaa qaadi karo. Siduu dhigayo sharciga Finland ee ka hortaga cudurada faafa, haddii loo baahdo qofka bukaanka ah si khasab ah baa loogu xukumi karaa inuu qaato daryeelka karantiinka, si looga hortago faafitaanka cudurka.

Maxaa loola jeedaa soo ogaanshaha dadka uu qofku la kulmay?

Haddii cudurka qaaxadu uu yahay heer qofku uu qof kale qaadsiin karo, ama qofka cudurka qabaa yahay ilmo, iyadoo la raacayo sharciga ka hortaga cudurada faafa ayaa waxaa la sameeyaa in la ogaado dadka uu qofku la kulmay. Ujeedadu na waa in la joojiyo faafitaanka cudurka. Waxaa dhici karta in dadka qofka cudurka qaba u dhow ee uu ku dhexjiro qaar ka mid ah ay cudurka qaadeen, ama jirradeen ama waxaaba dhici karta in qofkii bukaanku uu cudurka ka qaaday dadka ku dhexjiro. Kalkaalisada caafimaadka iyo qofka bukaanka ah ayaa si wadajir ah u raadinaya dhammaan dadka qofka bukaanka ah u dhow ee uu wakhtiguu cudurka qaaday aad ugu dhexjirey. Dadkaas waa loo yeerayaa oo rugta caafimaadka ayaa lagu baarayaa, carruurta ay suuragalka tahay inay cudurka

Jyrki Luukkonen

qaadeenna isbitaalka ayaa lagu baaraa. Dadkoo dhan waxaa laga qaadaa raajo sambabada ah, dadka astaamaha jirrada looga shakiyana saami xaako ah ayaa laga qaadaa. Dadka uu cudurku ku dhacay waa la daaweeyaa, carruurta ay khatarta ahayd inuu cudurku ku dhaco iyo dadka unugyada difaacoodu liitana waxaa la siiyaa daawo ka hortag ah. Dadka kale ee qofka cudurka qaba wax dhex mareena xaaladooda muddo hal sano ah ayaa taxader ahaan loola socdaa, iyadoo laga qaadayo raajooyin cusub oo sambabada ah markay lix bilood iyo 12 bilood ka soo wareegaan wakhtigii baaritaanka bilowga ah lagu sameeyey.

Sida daaweynta loo fuliyo iyo sida loola socdo

Isbitaalka adoo ku jira ayaa daawooyinka laguu bilaabayaa, marka dambana isbitaalka ayaad wakhtiyada laguu qabto kontorool ahaan u imaanaysaa si xaaladaada loola socdo. Iyadoo lagaa warhayo ayaa daawooyinka isbitaalka lagugu siinayaa, markaad isbitaalka ka baxdo ka dib xitaa inta badan iyadoo lagaa warhayo ayaa daawooyinka qaadashadooda la sii wadaa. Hal mar ayaad bishiiba ama labadii biloodba (1-2 bil) kontorool ahaan u imaanaysaa, si uu dhakhtarku u qiyaaso siday daawadu wax kuugu tartay iyo sida uu caafimaadkaagu yahay, oo dhiigag iyo raajooyin sambabada ah ayaa lagaa qaadayaa. Xaakada wakhtiyo loogu talagalay ayaa lagaa qaadayaa si loo hubsado in bakteeriyada qaaxada keentaa ay saamiga xaakada uga baxday oo u baaba'day.

Ilaalinta daaweyntu waxay caawinaysaa sidii aad u bogsan lahayd

Ilaalinta daaweyntu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah daawooyinka daryeelkaaga. Ujeedaduna waa in lagugu taageero siduu u fuli lahaa daryeelkaaga daweynta ah ee wakhtiga dheer soconaya, iyo in lagaa caawiyo sidii aad cudurka uga bogsan lahayd. Kalkaalisada ama qof kale oo loo tababaray daryeelka daawada ayaa ku xasuusinaya inaad daawooyinka qaadato, qofku wuxuu sidoo kale fiirinayaa inaad liqday dhammaan daawooyinka aad qaaxada u qaadato. Isla markaasna qofku wuxuu la soconayaa caafimaadkaagu siduu yahay iyo haddii ay daawooyin cillad kuu keenaan, wuxuuna kaa caawinayaa in wakhtiyada kontoroolku sidii loogu talagalay u fulaan. Qofkaasi waa qof ku taageeraya oo aad kala sheekaysan karto xaaladda cafimaadkaaga iyo waxyaabaha kale ee maskaxdaada ku jira.

Naftaada si fiican u daryeel

- **Waa inaad u qufacdaa sida laguu sheegay ee loo qufaco**
- **Baro daawooyinkaaga magacyadooda iyo sida loo isticimaalo**
- **Daawooyinkaaga oo dhan u isticimaal sida loogu talagalay**
- **Ballamaha kontoroolka waa inaad wakhtiyada loogu talagalay tagtaa**
- **Adkaysigaa abaalmarin lagu helaa – qaaxada waad ka bogsooneysaa, haddii aad daawooyinkaaga oo dhan si joogto ah u qaadato muddada daawooyinku kuu socdaan oo dhan**

Waxaa dhici karta inay daawooyinka cillad keenaan

Cilladaha daawooyinku keeni karaan waxay inta badan yimaadaan marka daawooyinka la bilaabo ka dib inta lagu jiro todobaadyada ama bilaha ugu horeeya. Cilladaha sida caadiga ah yimaadaa waa lalabbo aan aad u darnayn iyo cillado xagga caloosha. Cilladahaasna waxaa laysku dayaa in laga hortago, iyadoo wakhtiyada daawooyinka la qaadanayo la bedbedelo ama haddii loo baahdo qofka waxaa la siiyaa daawooyin cilladahaas qofka u sahlaya. Haddii ay qandho ku qabato ama uu ku qabto calool xanuun aad u daran ama maqaarka jirkaaga uu isbedel ku yimaado, isla markiiba u soo sheeg kalkaalisada u xilsaaran inay daryeelka daawooyinka ilaaliso ama dhakhtarka daryeelkaaga qaabilsan. Markay sidaasi dhacdo daaweynta waa la joojiyaa oo xaaladda qofka waxaa lala socdaa iyadoo dhiigag laga qaadayo. Marka cilladuhu degaan ayuu dhakhtarku mar labaad qofka daaweynta u bilaabaa.

Ka bogsashada cudurka qaaxada

Cudurka qaaxada waad ka bogsanaysaa, haaddaad daawooyinka dhakhtarku kuu qoro oo dhan si joogto ah u qaadato muddada daaweyntu kuu socoto oo dhan. Waxaa aad muhiim u ah inaadan daawooyinka joojin ama aadan adigu daawooyinka wax beddelaad ah ku samayn, markaad dareento in astaamihii cudurku kaa baaba'een. Haddii aadan daawooyinka qaadan, ama aad daawooyinka si aan joogto ahayn u qaadato ama aad caddadkii laguugu talagalay mid ka duwan qaadato cudurku wuu kugu sii xumaanayaa, waxaana dhici karta in bakteeriyadu noqoto mid daawooyinka u adkaysan karta oo daawooyinku aanay waxba ka tarayn. Labada siyoodba waxay keenaan, in daaweynta cudurku sii adkaato, oo xitaa waxaa dhici karta in cudurka loo dhinto. Adigu waxaad tahay qofka doorka ugu weyn ka ciyaaraya sidii daaweyntaadu u hirgeli lahayd, sidaas darteed saamayn baad ku yeelan kartaa, inaad cudurka ka bogsato iyo in kale. Shaqaalaha ku daaweynayaana way kugu garabtaagan yihiin.

Arrimaha kharashka iyo shaqo awoodidda

Baaritaanadda qaaxada, daawooyinteeda, daryeelka aad isbitaalka ku jirto iyo daawooyinkuba lacag la'aan bay adiga kuu yihiin. Inaad shaqayso waxaad awoodaa, markuu dhakhtarku caddeeyo inaad dadka kale cudurka qaadsiin karin, daawooyinkuna u socdaan si dhibaato la'aan ah, xaaladdaada guud ahaaneedna ay fiican tahay oo aad awoodo inaad shaqadaada qaban karto. Waxbarashada iyo carruurta xannaanada dhigatana iyo iskuuleyduna waa sidaas oo kale. Hadday jiraan waxyaabo la xiriira awoodda shaqo qabashada, dhaqaalaha nolosha, xagga hirgelinta daryeelka iyo arrimaha guriga la xiriira waxyaabahaas oo dhan sooshaladda ayaad kala hadli kartaa intaad isbitaalka ku jirto ama wakhtiyada aad kontoroolka isbitaalka u imaanayso.

Kuzma | Dreamstime.com

Inay dadka ehelka ama saaxiibadu ku taageeraann waa muhiim

Aad bay muhiim u tahay in dadka ehelkaaga ah og yihiin cudurkaaga iyo daaweyntiisa, si ay kuu taageeraan muddada daawooyinku kuu socdaan, kuuna caawiyaan sidii aad cudurka uga bogsan lahayd.

Tilmaansiinta iyo wararka la soo xiriiridda

Markaad isbitaalka ka baxayso hubso, inaad haysato wararka ku saabsan sidaad daawooyinkaaga u isticimaalayso iyo wararka ku saabsan waxyaabaha ay tahay inaad samayso haddii dhibaato timaado. Waxaad kaloo hubsataa inaad haysato wararka ku saabsan sida loola soo xiriiri karo dadka daaweyntaada ka qaybqaadanaya iyo meesha uu daryeelkaagu ka sii socon doono.

Faahfaahin dheeraad ah:
www.filha.fi
www. heli.fi
www.thl.fi
www.stoptb.org
www.who.int/tb/en/